

WARBIXINTAA ISBADDALKA DAKHLIGA FOODSHARE WISCONSIN

(Soo-sheegidda Reerka Yaraaday)

FOODSHARE WISCONSIN INCOME CHANGE REPORT (REDUCED REPORTING HOUSEHOLDS)

Haddii saacaddahaaga bilaha ah ee aad shaqayso loo dhimo in kayar 80 bishiiba ama dakhligaaga guud* ee soo gala reerkaada bil kasta uu ka badanyahay xadka dakhliga la soo sheego, sida lagu muujiyay hoos, waxaad isbaddalka u sheegtaa wakaaladaada xaafadda ugu dambayn 10ka bisha xigta. Haddii isbaddalka noocaas dhaco, waxaad:

- Isbaddalka ku soo sheegtaa internetka access.wisconsin.gov.
- Buuxi warbixintaan kuna soo dir boostada ama faks ahaan:

Haddii aad ku nooshahay Dagmada Milwaukee:
MDPU
PO Box 05676
Milwaukee WI 53205
Faks: 888-409-1979

Haddii aadan ku nooleyn Dagmada Milwaukee:
CDPU
PO Box 5234
Janesville, WI 53547-5234
Faks: 855-293-1822

- Ama waxaad wici kartaa ama waxaad u geyn kartaa wakaaladaada. Waxaad cinwaanka iyo telefoonka wakaaladaada ka heli kartaa www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm ama marka aad wacdid 800-362-3002 ama 711 (TTY).

Tusaale ahaan: Waxaad bilowday shaqo cusub bishii Agoosto 1 taas oo ku siisa in ka badan waxa aad iminka sameysid iyo kiiskaada waxaa ku jira saddax qof oo qaata manaafacaadka FoodShare. Haddii dakhliga guud ee soo gala reerkaaga bil kasta bisha Agoosto ka badan yahay xadka dakhliga aad soo sheegtay ee \$2,252, waa in aad isbaddalka u sheegtid shaqaalaha FoodShare ugu dambayn Sateembar 10. Waxaad kaloo xisaabta lagaa rabo in aad soo sheegtid ka heli kartaa warqadii ugu dambaysay ee diiwaan gelintaada.

*Macnaha dakhliga guud waa in dhammaan dakhliga, **dakhliga shaqada ama mushaarka iyo Dakhliga Kale**, uu qof kasta oo uu oo ka tirsan reerkaada qaatay kahor inta aan waxba laga goynin sida canshuurta iyo lacagaha laga reebo.

XadkaSoo-Sheegidda Dakhliga Bil Kasta Oktoobar 1, 2018, ilaa Sebteembar 30, 2019*			
Tirada Reerka	Xadka Dakhliga Bil Kasta	Tirada Reerka	Xadka Dakhliga Bil Kasta
1	\$1,316	6	\$3,656
2	\$1,784	7	\$4,124
3	\$2,252	8	\$4,592
4	\$2,720	9	\$5,060
5	\$3,188	10	\$5,528

*Qaddarkan dakhliga waxay ku saleysan yahiin tilmaamaha saboolnimada federaalka ee 2018–2019 waxay ku beddelaysa kor u kacida Oktoobar kasta. Qof kasta oo dheeraad ah oo aqalka qoyska kusoo kordha qofkiiba waxaad ku dartaa \$468 ee ah xadka dakhliga.

Waxaad sii wadi kartaa in aad soo sheegtid isbaddalada kale, sida isbedelka cinwaanka, gurka, dadyoowga ku kordha ama ka guura reerkaaga, ama hoos u dhaca ku yimaada dakhliga soo gala reerka bil kasta, hase ahaatee, lagaagama baahna in aad sidaas sameysid. Haddii aad dooratid in aad soosheegtid isbaddaladaan, la xariir wakaaladaada.

Macluumaadka qofka lagu aqoonsan karo waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya maamulka FoodShare Wisconsin.

Magacaaga	Nambarka Kiiska
-----------	-----------------

ISBADALKA DAKHLIGA

Isbadalka Saacaddaha Dakhliga iyo Mushaarka

Magaca Qofka Shaqeeyay		Loo-Shaqeeyaha	
Mushaarka Saacad Kasta \$	Saacadaha Halkii Todobaad	Inta Jeer la Bixiyo	Taariikhda la Bixiyo Mushaarka Kowaad

ISBADDALKALE EE KU YIMAADA DAKHLIGA

(tusaale ahaan, manaafacaadka Soshal Sekuriti, hawlgabka, lacagaha W-2, manaafacaadka shaqo joojinta, masruufka cunugga iyo taakuleynta xaaska)

Magaca Qofka Qaata Dakhliga Aan La Shaqeysanin	Taariikhda Dakhliga Bilowday
Isha Dakhliga	Xisaabta Cusub Bil Kasta \$

XISAABINTA DAKHLIGA

Isticmaal booskaan si aad u heshid xisaabta dakhliga guud bil kasta ee reerka.

Bisha Isbaddalka	Tirada Dadka ku jira Reerka
Iskudarka Dakhliga Guud Aan La Shaqeysanin	\$
Iskudarka Dakhliga Guud Shaqada Bil Kasta iyo Mushaarka	+ \$
Iskudarka Dakhliga Guud Reerka Bil Kasta	= \$

Ma fileysaa inay isbaddalada lagu soo sheegay foomkaan ahaan doonaan isla sidooda bisha xigta? Haa Maya
Haddii aysan sidaas ahayn, kusharax hoos.

Kharashka

Aniga waxaan fahamsanahay in kharashka aan soo sheego sida hooyga, danabka, xanaanada cunugga, masaruufka ilmaha ama kharashka caafimaadka saamayn karaan heerka manaafacaadka FoodShare uu reerkeyga qaato. Aniga waxaan fahamsanahay in aan la soo sheegin ama la xaqiijinin kharash waxay la macno tahay in aan rabin in aan la yareeyo kharashkaan.

Yareynta Dakhliga

Aniga waxaan fahamsanahay in leyga baahneen in aan soo sheego hoos u dhaca ama luminta dakhliga; hase ahaatee, haddii aan sidaas sameeyo, waxaa dhici karto in aan xaq u yeesho mnaafacaadka FoodShare oo badan. Aniga waxaan fahamsanahay in aanan soo sheegin dakhliga soo gala reerkeyga bil kasta ama aan lumiyo dakhliga reerkeyga, in aan la kordhin doonin manaafacaadka aan ka qaato FoodShare.

DIGNIINTA CIQAABTA FOODSHARE WISCONSIN

Xubin kasta reerka oo si ula kac ah u jebiya sharciyada soo socda waxaa laga mamnuuci karaa FoodShare Wisconsin ilaa 12 bil jebinta kowaad kaddib, 24 bil jebinta labaad kaddib ama jebinta kowaad marka ay ku lug leedahay maaddo la kantaroolo, iyo si joogto ah xagga jebinta saddaxaad:

- In la bixiyo macluumaad been ah ama la qariyo macluumaad si loo helo ama loo sii qaato manaafacaadka FoodShare,
- Ka ganacsi, iibinta ama baddalaadda manaafacaadka FoodShare,
- Isticmaalka manaafacaadka FoodShare si loogu iibsado waxyaabaha aan raashinka ahayn, sida qamrada ama tubaakada, ama
- In la isticmaalo manaafacaadka FoodShare ee qof kale, kaararka aqoonsiga ama warqado kale.

Sida ku xeran qiimaha manaafacaadka sida qaldan loo isticmaalay, shakhsiga waxaa kaloo lagu ganaaxi karaa \$250,000, waxaana la xeri karaa ilaa 20 sanno, ama waxaa leysugu dari karaa labadaba. Maxkamadda waxay kaloo shakhsiga ka hor istaagi kartaa barnaamijka muddo 18 bil dheeraad ah. Si joogto ah ayaa lagaaga reebi doonaa haddii laguugu helo ka ganacsiga manaafacaadka FoodShare in la'eg ama ka badan \$500. Xaq uma yeelan doontid in aad ka-qeybgashid muddo 10 sanno haddii laguugu helo in aad soo jeedisay oraah ku dhisan khayaano ama khayaano mattasha xagga aqoonsiga iyo hooyga si aad isla mar u heshid manaafacaad badan. Xaq uma laha barnaamijka dambiileyaasha baxsadka ah iyo kuwa jebiya muddada tijaabada/laga sii daayay xabsiga. Waxaa kaloo dhici karta in qofka lagu qaado dacwad sida hoos timaada sharciyada kale federaalka ee lagu dabaqi karo.

Haddii manfacyada FoodShare aad ku (iibsato ama aad ku iibiso) maandooriye /daroogo sharci daro ah, waxaa lagaa mamnuuci doonaa barnaamijka FoodShare muddo labba sanno ee ah marka koowaad ee lahelu iyo in si ebed ah lagaaga saaro barnaamijka tookada labbaad ee laguugu qabto. Haddii aad ku (iibsato ama aad ku iibiso) wax hub ah, rasaas, ama walxo qarxa, barnaamijka FoodShare Wisconsin ebid ayaa lagaaga mamnuuci doonaa.

SIXIIXA – Ka-qeybgalaha/Wakiilka La Oggolaaday

Taariikhda la Sixiixay

Nambarka Telefoonka

RETAIN COMPLETED FORM IN CASE FILE

Warbixinta Takoor La'aanta

Si waafaqsan sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo Maraykanka. Waaxda Beeraha (USDA) shuruucda xuquuqda madaniga ah iyo xeerarka, USDA, Wakaaladaheeda, xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha ka qayb galaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucay ku takoorida ku salaysan isirka. midabka, asalka wadaka, galmada, caqiidada diinta, naafanimada, da'da, rumaynta siyaasadeed, ka aarsiga ama aargoosiga hawl xuquuq madani oo hore barnaamij kasta ama hawl ay qabatay ama maalgelisay USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh oo macluumaadka barnaamijka ah (tusaale, Farta qoraalka indhoolaha, daabacaad wayn, cajal maqal ah, Luqadda Dhegoolaha ee Maraykanka, iwm), waa inuu la soo xidhaadhaa Wakaalada (Gobol ama degmo) halka ay ka soo codsadeen dheefaha. Dadka dhegoolaha ah, maqalku ku adagyahay ama leh naafo hadalka ah waxay kala soo xidhiidhi karaan USDA Is gaadhsiinta Federaalka ee Dadka Nafada ah lambarkan (800) 877-8339. Intaa waxa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqaddo kale.

Si loo gubiyo cabashada takoor la'aanta, buuxi foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka UDSDA, (AD-3027) oo onlayn lagaga helo:

[How to File a Complaint](#), iyo xafiis kasta oo USDA ah, ama qor warqad ku socota USDA oo warqadda ku bixi dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. si aad u codsato nuqul foomka cabashada ah, soo wac **(866) 632-9992**. U soo gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda USDA addoo adeegsanaya:

- (1) boosta: Maraykanka. Waaxda beeraha
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;
- (2) fax: (202) 690-7442; or
- (3) iimaylka: program.intake@usda.gov

Hay'dani waa adeeg bixiyaha fursadda loo simanyahay